Läusecrew der Stadt Thun
Regula Heubach-Traxler, Läuseverantwortliche
regula.heubach@bluewin.ch,
www.thun.ch/gesundheitsdienste

Injirta (Somalisch)

Injirtu waa cayayaan aan baalo laheyn (Pediculus humanus capitis), Waxaa lagu gartaa dhinac walba waxey ku leedahay sadax lugood waxey kaloo ay lee dahey mici ay wax ku dhuuqda. Lugaheeda qaybaha ugu danbeesa waa sida Cijo (Cidiyo) wayna Qalqaloocan yihiin. Injirtu Lugaheedan si fiican ayey Tiramaha u qabsan kartaa. Matalan Tinta ku kor dhaqaaqi kartaa, injirtu Timaha wey ku kor socon kartaa, Balse Cararikarto (Ordi karto) ma duuli karto (biibit) mana dabaalan karto (dawaalasho). Injarta tan weyn dhirir ahaan waxey gaari kartaa 2.5 ilaa 3.5 mm. Qolofteeda injirta nooc ahaan waa waa midab wax laga dhax arki karo (transparent) sida cadaan-shaah cadees ama Kafey (Baroon). Midibkeedu waxey mar walba u ektahey jirka qofka ay saaran tahey. Marka ay injirtu Dhiiga dhuuqdo noocdeeda ama kolorkeeda wuxuu isu badalaa si GADUUD (Casaan) ah Qolofteeda (Maqaar) hoos tiisa ayuu dhiiga ka soo dhax bilqayaa.Injirta madaxa waxey sideedaba ku noolaataa Timaha Madaxa Bani adamka. Meelaha ay ugu jeceshahey waa Madaxa qaybtiisa danbe, Jeegada, Dhegaha gadaashood iyo Madaxa dhinac yadiisa (Xiska).Injirta madaxa 2 ilaa iyo 4 saacadoodba waxey Cabtaa dhiig cusub, waxey jeexdaa maqaarka kare marka meesha ay furto ayey dhiiga ka dhuuqdaa. Isla markaana waxey jirka mu shubtaa Sun (Toxin) ,taas oo keenta in meesha ay jeexdey aynan xermin iyo waxey keentaa cuncun. InjirtaLabta ah nolashiisa waxey gaarta qayaastii 15 Maalmood, Dhadigana waxey nooladaan 30 ilaa 40 Maalmood. Cilmiladu markey ay tahey 28 ilaa 32 Grad si fiican ayey ugu Noolaadaan. Dhiig la,aan waxey injirtu noolaankartaa ugu badnaantii 3 Maalmood.

Injirta madaxa waa dhib Aduunka dhan laga yaqaan, Qayb walba dunida iyo iyo Qomiyad walba sidee rabto ha u noolaatee waa laga helaa. Weerarka Injirta sanadkii la soo dhaafey aad ayuu u batey. Waxaa kaloo sii kordhiyey Safaradii iyo musaafiriintii oo batey,iyo dadka soo Hijroodey. Injirta waxey aad u badan tahey anaga akteena fasaxyada iskuulka ka dib. 60% Dadka ay weerrerto injirta waa Caruurta kuwa ay da,dooda u dhaxeeso 5 ilaaa iyo 11 jir. Wererka ama gelida injirta macnaheedu ma aha nidaafo xumo, xataa Caruurta maalin walba Timahooda dhaqa, injir wey gali kartaa.

Der Lebenszyklus



Nissen Qandhacin (Qanjaciil)

Qandhacinku waa ukunta injirta madaxa. Injirtu waxey maalintiiba dhashaa 3 ilaa 8 ukumood., guul ahaan nolasheeda oo dhan waxey dhashaa qayaastii 100 ilaa iyo 300 ukumood, waxeyna ku dhashaa timaha meesha ay ka bilaawdaan maqaarka sare. Qandhacinku (Qanjaciilka) qaab ahaan wey dhuuban tahey ma aha wareeg, waxeyna gaarayaan 0.4 ilaa iyo 1 mm weyn. Waa midib furan, waxey u ek yihiin sida aus wie Schuppen, Lakiin Timaha ma ka foqaayaan.

Sida leysugu gudbiyo

Marka hore waxaa leysugu gudbiyaa marka ay **Bani Adamka (Dadka) Madaxyadooda si toos ah ay isku gaaraan.** Injirta waxaa kaloo leyskaga qaadaa iyadoo aan **si toos ahey** Sida Shanlada, Buraashka timaha, Koofidyadaha, iyo koofidaha Baskiilada (Velohelm) iyo (Stirnbänder). Xeywaanada Guryaha ku nool ma gudbiyaan Injirta madaxa.

(Symptome) Waxyaabaha lagu yaqaan

- Cuncunid (Laasiman ma aha) Dhareeraha dareedeed. Qaybaha madaxa dhinaciisa danbe iyo Jeegada, dhagaha gadaashii meelahaas ayey ugu badan yahiin. Maqaarka Jeegada oo Gaduuto (Meelo ay durtey), ayaa waxa keenaya in mar walba la xoqo.
- Mar marka qaarkood ayey bararaan (Lymphknoten) waa meelaha dhiiga cad ku safeesma.

Sidaa ayad u heli kartaa hadii ay jiraan wax Injir, Qaldhacin,iyo ukumo

1. Ku baar ilmahaaga meel aftiin ah.
2. Intaadan Baarin ka hor, Madaxa ha taaban marka hore si fiican u fiiri, hadii aad injir ka arki kartid. Bevor Sie die Haare untersuchen, den Kopf nicht anfassen und nur gut beobachten, Injirtu wey is qarisaa hadii timaha la taabto.
3. Timaha marka la dhaqo ka dib Daawada loogu hor tago si fiican ugu shub. Ka dibna timaha bqab qab bilawga ilaa timaha dhamaadkood shanlada loogu tala galey ku shanleey. Mar walba aad aad qayb shanleyso, shanlada warqada cad Jikada ku isticmaasho ku tir.
4. **Qandhacinka (Qanjaciilka) timaha aad ayey ugu dhagaan waxaa laga fujin kara adiga oo isticmaalaya Cidiyaaga (Cijo) Waxaa kale oo ku caawin karaa dhalada wax lagu fiiri weyneysada raadinta injirta iyo qandhaciilka**.
5. Shambada Daawada ah ugu danbeyntiina markale ku dhaq.
6. Mar walba madaxa oo dhan ka baar.

Shanleenta – iyo Hab isticmaalka

Goorma	Waa maxey
Maalinta 1aad	**A:** Hadii ay jiraan injir ama qandhaciilku daawee daawada injirta injirta oo dhanna shanlo kaga saar , Qandhaciilkana Ciji kaga sar. **B:** Hadii aynen injir ama Qandhaciil ama ukumo eyn jirin Daawo ismaalkeeda looma (Balse ku koontorol shanlada injirta 7 maalmood ka).
Maalinta 3aad.	**A:** Shanleey (hadii ay jiran wax injir ah markale ku kontorool shanlada) Qandhaciilkana Cijo kaga saar.
Maalinta 7aad.	**A:** Daawad labaad ee injirta isticmaal sidii maalintii 1aad oo kale. **B:** Shanlo ku baarid.
M.10aad	**A+B:** Shanlo ku Baarid
Maalinta 14aad.	• Hadii ay wali wax jiraan ama kuwo cusub: Ka hortag cusub bilaaw. Sidii maalintii 1aad Daawada injirta isticmaal shanlada injirtana ku shanley“. • Hadii aynan jirin wax injir iyo qandhaciil ama ukumo ah sidaa ayey hooshii daaweenta ku dhamaatey.
Maalinta 21aad	Hadii injir cusub timaado labo asbuuc shanley ah ayaa loo baahan yahey (asbuuciiba 1 ma).
Maalinta 28aad.	Hadii injir cusub timaado labo asbuuc shanley ah ayaa loo baahan yahey (asbuuciiba 1 ma).

Baaritaanka labaad hadii cunugaaga / taada markale ay ka helaan qoloonyinka u xilsaaran injirta,injir ama qandhaciil ama ukumo waxey u Sheegayaan Dakhtarka iskuulka asagana wuxuu qoraayaa warqad Cunugtaada / gaaga looga Reebayo iskuulka ilaa ay injirtaas ka baxdo.

Muhiim

- Fadlan hadii aad ilmahaaga ku aragto injir usheeg iskuul ama Tagesschule, Saaxiibadaada,iwm.
- Farmashiyaha ka doono Daawada sida Daawaayinka soo socda (z.B. Rausch, Laus-Stop, Lies-Ex, Hedrin, Pedicul, Hermal). Daawada u isticmaal sida ay Baakada qoran tahey, Dawada waa Kimikal waa inaad ka taxadirtaa qatarteeda.Das Produkt genau nach Packungsbeilage anwenden. Chemische Produkte enthalten Insektizide und sind nicht unbedenklich. Weiter kann sich eine Resistenzbildung entwickeln, das heisst, Läuse werden nicht mehr abgetötet.
- 1 mar isbuucii Qoyska oo dhan waa in injirta iyo qandhaciilka laga baaraa.
- Shanlooyinka, Buraashyada timaha, iyo wax walba oo timaha ku shaqa leh waa in 15 daqiiqo Biyo kulul Sabuun ku jirta la dhax dhigaa ka dibna la nadiifiyaa.
- Waxyaabaha la dhaqi karo oo aad istimaashaan waa in la dhaqaa Qasaalada ku dhaq 40 – 60 garaad. Ama 7 maalmood in la isticmaalin lana dhax dhigo Bac laguna xero (Qaas ahaan xeewaanada suufka ah iyo Barshinta).
- Dharka, Boleesterka iyo Maryaha Sariirta waa Maalinta 1aad in laga shaqeeyaa Maalinta 7aadna la nadiifiyaa. Hadii kale 14 maalmood ka dib.
- Timaha dheer waa in la xiraa, si loogu hortago ama loo yareeyaa u gudbinta dadka kale.
- Velohelme,waxyaabaha madaxa lagu dawoolo,Timaha waxyaabah lagu qurxiyo iyo buraashka Timaha yaan lwysla qeybsanin.

Wixii su,aal ah kala xiriir Madam Regula Heubach-Traxler (regula.heubach@bluewin.ch) zur Verfügung.
Läusecrew Stadt Thun, September 2013